

## **ESBL - Macluumaadka bukaanka**

Mid ka mid ah baaritaanadaada ayaa muujinaya inaad qabtid bakteeriyada samaysa Extended Spectrum BetaLactamase (ESBL). Si sahal ah looguma daawayn karo antibiyootiga caadiga ah. Markaa inta aad isbitaalka ku jirto, waxaa jiri doona tallaabooyin gaar ah oo adiga ku khuseeya si looga hortago ku faafitaanka bukaanada kale. Waxaan rajaynaynaa in macluumaadkani ku fahamsiiyo sababta loogu baahan yahay tallaabooyinka noocan ah.

## **Waa maxay ESBL?**

Bakteeriyada soo samaysa ESBL waxaa inta badan laga helaa mindhicirka. ESBL waxay bakteeriyada ka dhigtaa kuwo u adkaysan kara dhowr ka mid ah antibiyootiga caadiga ah. Sida caadiga ah qofku ma dareemayo inay jidhkisa ku jiraan, laakiin marmar waxay keeni karaan infekshan.

## **ESBL khatar ma tahay?**

Bakteeriyada samaysa ESBL-ku khatar maaha marka ay ka mid yihiin bakteeriyada caadiga ah ee ku jira mindhicirka. Mararkaas oo kale waxaa qofka loo yaqaanaa qof side ah, oo ma u baahna daweyn. Maadaama ay adkaan karto in la daweyyo infekshannada bakteeriyada ESBL-ka sameeyaa , ma rabno inay ku faafaan isbitaallada.

## **Sidee ayaad ku qaaday ESBL?**

Bakteeriyada mindhicirka waxaa lagu kala qaadaa gacmo aan nadiif ahayn, meelaha la taabto ee aan nadiif ahayn, ama cunto iyo biyo wasakhaysan. Bakteeriyada ESBL-ka sameeyaa waxay ku badan yihiin meelaha ka baxsan wadamada Waqooyiga Yurub, oo markaa haddii qofka la dhigo isbitaalada waddamada kale waxa kordhaysa khatarta qaadista.

## **Sidee loo daweyyaa ESBL?**

Haddii aad qaado infekshanka bakteeriyada noocaas ah, daawayntu waxay u baahan doontaa antibiyootiko ka duwan kuwa caadiga ah. Sidaa darteed, daaweynta infekshannada noocan oo kale ah waxaa lala xiriiyaa waxyeellooyinka daawada oo kordha iyo joogitaan isbitaal oo dheer.

## **Maxay sameeyaan shaqaalaha caafimaadku si ay uga hortagaan faafitaanka bakteeriyada ESBL-ka samaysa?**

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad keligaa joogto qol kuu gaar ah si looga hortago qaadiinta bukaanada kale. Mararka qaarkood, shaqaalaha caafimaadku waxay isticmaali doonaan qalabka la isku ilaaliyo sida galoofisyada/gacmaha iyo jaakad huruud ah. Waxaa jira noocyo kala duwan oo ah bakteeriyada samaysa ESBL, oo markaa shaqaalaha caafimaadka ayaa markasta qiimeyn doona nooca tallaabooyinka ka hortagga ah ee loo baahan yahay. Waa muhiim in qof kastaa nadiifiyo gacmaha marka ay soo galayaan qolkaaga iyo marka ay ka baxayaan.

## **Maxaad samaynaysaa markaad guriga tagto?**

- In gacmaha si wacan loo nadiifiyo iyadoo la isticmaalayo aalkolada nadiifinta gacmaha ama gacmaha lagu dhaqo saabuun iyo biyo ayaa ah waxa ugu muhiimsan ee

lagaga hortagayo faafitaanka bakteeriyada. Sida kale waxaad u noolaan kartaa oo u shaqayn kartaa si caadi ah.

- Sheeg inaad qabtid ESBL markasta kasta oo aad tagtid ama la xiriirtid goobaha caafimaadka. Markaa waxaa la samayn karaa tallaabooyin ka hortag ah, si looga hortago faafitaanka ESBL. Kaliya xarumaha caafimaadka ayaa la sameyn doonaa tallaabooyin gaar ah oo khuseeya qofka qaba ESBL.